

## Talaalka ku saabsan covid-19 adiga jira 12–15 sanno ee Värmland

Gobolkaan Värmland waad awoodaa adiga jira da`da inta u dhaxeyasa 12 iyo 15 sanno inaad iska talaasho koofilaha covid-19 taasoo bilaabaneysa bilowga bisha nofeembar. Hay`ada caafimaadka shacabka waxay ku talineysaa in la talaalo carruurta iyo dhallinta da`dooda ka bilaabato 12 sanno. Ilmihii waa iney 12kii sanno ay buuxiyeen si ay u helaan talaalkii. Kan weli aan 12kii sanno buuxinin waxaa lagu martiqaadi doona talaalka waqtiyada dambe ee socda.

Talaalkaan koofilaha ee covid-19 khasab maaha iyo waana lacag la`aan.

### Dugsiga ayaa warbixin idin siinaya

Dugsigii wuxuu sameynayaa inuu warbixin idinka siiyo waqti iyo meesha laysaga talaalayo koofilaha ee covid-19. Adiga aanan dhigan dugsiga hoose/dhexe wac meesha laga balansado halkaan taleefoonkaan 010-831 80 70 si aad u qabsato waqti.

### Buux-buuxi warqada ogolaansho siinta iyo caddaynta caafimaadka

Soo celi **warqada ogolaansho siinta** oo aad buux-buuxisay iyo **warqada caddaynta caafimaadka** iyadoo ku jirta baqshad xiran waa inaad u keento kalkaaliyada caafimaadka ee dugsiga sida ugu dhaqsaha badan oo ay kugu suurtagaleyso. Ilmaha weli aan buuxin 12kii sanno wey keeni karaan warqada ogolaanshaha iyo warqada caddaynta caafimaadka waqtigaan xaadirka ah.

Kalkaaliyada caafimaadka ee dugsiga ayaa fureysa baqshada iyo hubineysa in wax walba si dhameystiran loo soo buux-buuxiyey si talaalkii uu si fiican oo sahlan suurtagal ahna u fulo. Ma jiro qof kale oo shaqaalaha dugsiga ka mid ah oo qayb ka helaaya warbixintaan. Mana jirto warbixin ku saabsan talaalkii oo lagu keydinaayo dugsiga kadib markii talaalkii la fuliyey.

### Warqada ogolaansho siinta

Tani waa mid looga baahan yahay labada waalid ogolaansho si ilmaha u helo talaal.

Xaaladaha qaarkood ilmihii waa awoodaan oo ayna dhacdaa in nafsadiisa uu go`aan gaaro haddii ay timaado talaalka. Dadka wax talaalaya ayaa sameynayaan oo go`aan ka gaaraan qiimeynta u bislaanshaha shaqsi walba gooni ahaantiis haddii ilmihii uu gaaray ubislaanshaha oo nafsadiisa awoodo oo uu siin karo ogolaansho talaalkii, midaas oo loo yaqaano qiimeynta ubislaanshaha. Gacanta ugu horeysa waxaa qiimeyntaan ubislaanshaha waqtigaan xaadirka ah la qiimeynayaa ilmaha 15 sanno ama ka weyn.

### Wraqada caddaynta caafimaadka

Soo buux-buuxi iyo noo keen warqada caddaynta caafimaadka sida ugu dhaqsaha badan oo ay kuu suurtagaleyso. Qofka ku jawaaba ``haa`` su`aalahaas kuwo ka mid ah oo ku saabsan caddaynta caafimaadka wuxuu u baahan yahay inuu waco ``Region Värmlands`` meesha waqtiga laga balansado halkaan taleefoonkaan 010-831 80 70 si uu u helo in la qiimeyo xag daawo intaan la talaalin ka hor. Haddii aad ka hesho fasax lataliyayaasha xaga balanta laga sameysto ilmihii waxaa laga talaalayaa dugsiga,, ku qor warbixintaas warqadaha caddaynta caafimaadka aad noo keeneyso.

### Talaalka waalidka Vaccination för vårdshavare

Haddii adiga waalidka ah aadan talaaleyn waxaa dhaceysa adiga xitaa inaad hesho iney kuu suurtagasho arintaan darteed in lagu talaalo laakiin ka baxsan dugsiga waqtigiisa. **Warbixin ku saabsan waqti iyo meesha ka dhaceyso waxaa la soo gelinayaa halka websaytka 1177.se.**

Fariin gaarsii dugsiga haddii aad rabto adiga qofka weyn ah inaad raacdo ilmihii talaalkiisa.